

Ma ka walaacsantahay badbaadadaada gaarka ah?

Qof walba badbaado ku filan kama dareemo inay faahfaahintooda si guud loo arko doorka doorashada, laakiin tan macnaheedu maaha inay lumiyaan xaqa loo codeeyo.

Haddii aad u qalanto inaad is diiwaangeliso laakiin aad rumaysantahay in faahfaahintaada lagu diiwaangeliyo doorka doorashadu aay halis gelinayso badbaadadaada gaarka ah ama ta qoyskaaga ah, waxaad codsan kartaa inaad sii wado doorka qarsoodiga ee aan la daabicin.

Faahfaahinta diiwaangelintaada waxaa si amni ah u hayn doona Gudiga Doorashada oo qofna looma shaacin doono.

MA KA
WALAACSANTAHAY
BADBAADADAADA
GAARKA AH?



Complete this form to apply to go on the unpublished roll.

Full name:

Date of birth:

Contact phone number:

Email address

Address where you are enrolled to vote or have applied to enrol:

List any additional information provided to support your application:

Please tick one of the following:

I am already enrolled

I am not enrolled and I have enclosed a completed enrolment form

Signature/date:

➤ Complete and post to: Electoral Commission, PO Box 3220, Wellington 6140.

➤ Remember to attach any information that supports your application to register on the unpublished roll.

➤ For more information visit elections.org.nz



Sida loogu sii jiro laabka aan la daabicin.

Si aad u codsato inaad ku jirto laabka aan la daabicin iyu inaad ku soo celiso foomka buug yarahan. Haddii aanad hadda ka diiwaan gashanayn, waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad buuxiso foomka diiwaangelinta. Si aad u hesho foomamka diiwaangelinta ama foomamka codsiyada dheeraadka ah, waxaad kartaa:

- Inaad ka soo dejiso foomamka bogga elections.org.nz, ama
- Wac **0800 36 76 56** oo waxaanu boosta kuu soo dhigi doonaa foomamkaaga.



Macluumaadkee taageeraya ee aan u baahnay si aan u bixiyo?

Waxaad u baahan doontaa inaad bixiso macluumaadka taageeraya si ay u muujiso sababta aad doonayso inaad isku diiwaan geliso laabka aan la daabicin. Tusaalooyinka nooca macluumaadka waxaa ku jira:

- Warqad ka soo baxday loo shaqeeyahaaga, qareenkaaga, shaqaalahaaga bulshada, udoodahaaga ama qof meeqaam ku leh bulshada oo sharaxaya sababta shaqadaada ama duruufaha gaarka ah ay khatar adiga kuu geliyaan, ama
- Nuqul amarka ilaalinta ah oo ku dhaqan gelaya hoosta Xeerka Rabshadda Guriga ee 1995, ama
- Nuqulka amarka xayiraya oo ku dhaqan gelaya hoosta Xeerka Dhibaataaynta 1997, ama
- Macluumaadka ka socda sarkaalka Booliska ama sarkaalka Asluubta oo sharaxaya sababta badbaadadaada gaarka ah, ama ta qoyskaaga, ay dhib u gaysan karto daabacaada magacaaga iyo cinwaanka.



Bal ka waran haddii faahfaahintayda gaarka ah isbeddesho?

Waxaad u baahan doontaa inaad na ogaysiiso isbeddelka faahfaahinta diiwaangelintaada, sida magacaaga iyo cinwaanka. Waxaad sidoo kale waydiisan kartaa inaad dib ugu noqoto laabka la daabacay haddii duruufahaaga gaarka ah ay isbeddelaan.

La xidhiidh diiwaangeliyahaaga maxaliga ah ee Cod bixiyayaasha si loo cusboonaysiiyo faahfaahintaada/Faahfaahintooda. Xidhiidhka waxaa laga heli karaa elections.org.nz ama adoo soo wacaya **0800 36 76 56**.



Sideen u codeeyaa marka aan anigu ku jiro laabka aan la daabicin?

Waxaad ka codayn kartaa meel kasta oo laga codeeyo doorashada guud ama doorashada gaarka ah. Waxaad u baahan doontaa inaad cod bixin gaar ah bixiso sababtoo ah faahfaahintaada laguma dari doono laabka doorashada daabacan ee loo isticmaalay si loo soo saaro cod bixinta goobta laga codeeyay.

Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foom dheeraadka oo warqadda cod bixinta ah si aad u xaqiijiso dadka codka bixinaya halka aad ka diiwaan gashantahay inaad ka codayso. Uma baahnid inaad ku buuxiso cinwaanka ama macluumaadka magacii hore foomka haddii aanad rabin sidaas. Macluumaadka dheeraadka ee aad bixin karto in badan waxay naga caawin karta inaanu xaqiijino u qalmidaada inaad codayso.

Waxaa jiro qof joogo meesha codeynta si ay kuu tusiiso waxa la sameeyo iyo halka la aado.

Si aad u codayso doorashooyinka deegaanka, waxaad u baahan doontaa inaa waydiiso sarkaalkaaga cod bixinta ee Gollaha deegaanka inuu kuu soo diro warqadaha cod bixinta.



Level 10, 34-42 Manners Street,
PO Box 3220, Wellington 6140.